



Qaxooti ay dawlada Kanada caawimaad dib u dejin ah u fidisey



SOMALI

GAR

Qodobada wararka 2013

Hadii aad daneyneysid in lagu dajiyo Kanada ayna suaalo kuweydiiyeen khubaro u dhashey dalka Kanada, hada waxaad la yaabantahay waxa xigi doono, qodobadaan ayaa kaa siin doono faahfaahin buuxdo waxa xigi doono iyo akhbaarad kale ee ku saabsan Kanada.



Citizenship and
Immigration Canada

Citoyenneté et
Immigration Canada

Canada

Waxyabaha lagaaga baahan yahay in aad ka ogaatid hanaanka dib u dejinta.

Suaalo weydiinta waa talaabo muhim ah ee dib u dajintaada balse ma ahan tilaabada ugu dambeyso.

Hadii lagu doordey in dib u dajin lagu siiyo sida qaxooti ay dawlada caawimaad u fidisey [government-assisted refugee (GAR) / réfugié parrainé par le gouvernement (RPG)], waxey qaadan kartaa 6 bilood ama ka badan ka hor inta aad u socdaalin Kanada.

Waa kuwaan waxa xiga ee dhici doono.

Hanaanka codsiga

Ka hor inta aan la aqbalin codsigaaga, adiga iyo xubnaha qoyskaaga waa in aad maraan baaritaan caafimaad, mida kale waa qasab in aad martaan baaritan xaga amniga ah si loo ogaado in aadan dambi qatar ah galin waqtigiini hore iyo in aadan qatar amni ku aheyn Kanada, khubaro katirsan shaqaalaha Kanada ayaa go, aan ka gaari doono in aad imaanaysan Kanada.

- Waxey qaadan karta dhowr bilood kadib marka aad martaan suaalo weydiinta marka la idin dirayo baaritaan caafimaad.
- Shaqalaha dal ku galka Kanada ayaa dib u eegis ku sameynayo codsigiina si uu u ogaado in aad ku guuleysateen baaritaanka xaga caafimaadka, amniga iyo dambi baarista.
- Hadii ku guul dareysataan baaritanka xaga caafimaadka amniga iyo dambi baarista, ma la idiin dooran doono in aad diib u dejin ka heshaan Kanada.
- Dawlada ayaa ku war gelin doonto haayada socdaalka aduunka [International Organization for Migration (IOM) / Organisation internationale pour les migrations (OIM)] ama haayado kale oo ay dawlada Kanada ay shaqaalaysatey markii lagu aqbaley in dib u dejin lagu siiyey wadanka Kanada laguuna ogolaadey in aad u socdaashid dalka Kanada.
- Haayada IOM/OIM ama haayad kale ayaa kaa caawin doono in aad u diyaar garowdid safarkaada Kanada.

U soo safrida Kanada

Haayada IOM/OIM mise haayad kale ayaa kuu sheegi doonto taariikhda aad u safri doontid Kanada. Waxey kale kuu qaban doonaan diyaarada aad ku duuli doontid, ku geyn doonan garoonka diyaarada, kaa caawiyaan baaritaanka, iyo in ay caawimaad kale ku siiyaan garoonka diyaaradaha, hadii loo baahdo.

- Hadii aadan qabin bassaboora ama waraaqado socdaal, dawlada Kanada ayaa ku siin doonto waraaqado aad ugu safartid Kanada.
- Sida laguugu sharaxey suaalo weydiinta, (intarviiyuuga) qarashka ku baxaayo safarkaada Kanada iyo baaritaanka caafimaad waxaa amaah kaaga bixin doonto dawlada Kanada.
- Tani waa amah, taas oo ka dhigan in aad dib u bixin doontid dhamaan qarashka. 30 maalmood gudahood markii aad imaadid Kanadawaa in aad bilawdid bixinta dhamaan qarashka ku baxey safarka iyo baaritaanka caafimaad. Dib u bixinta waxey ahaan doonta qeyb qeyb, waxaad haysataa 1 ilaa 6 sanno in aad ku bixisid dhamaan qarashka kugu baxey, inta ay noqoto amaahda lagu siiyey.



- Waxaa kale oo aad heli doonta fursad aad ku raadsaato shaqo aadna ka shaqeysato Kanada si aad u taageertid nafsadaada iyo qoyskaaga.
- Mar hadii aad ku guuleysatid baaritaankaada caafimaad, waraaqadahaada ay diyaar yihiin, haayada IOM/OIM mise haayad kale ayaa ku geyn doonto garoonka diyaaradaha, kaa caawin doonto gelida garoonka iyo la tacaalida waaxda socdaalka ee garoonka.

Imaanshaha Kanada adigoo ku imaanayo qof ay dawlada Kanada caawimaad qaxooti u fidisey

Qof ay dawlada u caawisey qaxooti ahaan waxaa weeye in dawlada Kanada ay 12 bilood oo caawimaad daqaale ah ku siin doonto markii aad imaadid Kanada. Dawlada ayaa bixin doonto dhamaan qarashka caafimaad aad u baahatid kadib markii aad imaadid Kanada.



- Markii aad imaadid Kanada, shaqaale katirsan hayadaha u adeega dadka kucusub Kanada ayaa ku soo dhaweyn doono kuguna caawin doona elaboorka hadana kaa caawin doona u diyaar garowga maalmaha kuugu horeyso ee wadankaada cusub.
- Waxey ku siin doonaan meel aad dagto, sida guri mise albeergo, tani waa meel ku meel gaar ah inta aad ka heleysid guri kugu haboon oo aad daganaan kartid inta aad rabsid.
- Waxaa kale oo lagu siin doonaa raashin iyo dhar waxaadna la kulmi doonta dad sidaada oo kale kucusub wadanka.
- Shaqaalaha hayadaha u adeega dadka kucusub Kanada ayaa kaaga jawaabi doona suaalahaada kaana caawini doona u diyaar garowdid noolashadaada Kanada.

Dhowr isbuuc markaad imaadid gudahood, waxaad heli doonta caawimaad dhaqaale ee ka socoto dawlada Kanada, tani waxey kaa caawin doonta in aad iskaga bixisid qarashka waxyaabaha daruuriga ah sida raashinka, dharka iyo alaabta guriga iyo maacuunta. Waxaa kale oo aad heli doonta lacag bil kaste mudo hal sanno ah oo aad u isticmaali doontid raashinka iyo hoyga. Dawlada waxey kale kaa caawin doonta qaar kamid ah qarashka ku baxo caafimaadkaaga, oo aad u baahatid markii aad imaadid.

Waxaa intaa dheer in ururrada bixiya adeegyada ay kuu hayaan barnaamijyo kaa caawinaya howlo maalmeedkaaga sida gaadiidka bulshada, la kulanka dhakhtarka ama howlaha bangiyada. Ururadaan waxay kaa caawin karaan buuxinta fomamka, helitaankaaga kaarka deganaanshaha joogtada ah, codsiga caymiska caafimaadka iyo lambarka caymiska bulshada IWM. Waxa ay sidoo kale kuu hayaan adeegyo turjibaannimo ah si ay kaaga caawinayaan baahidaada gaarka ah sida inaan macluumaadkaaga caafimaad ugu gudbisno dhakhtar.

Ururrada bixiya adeegyada waxay sidoo kale bixiyaan tababar luuqadaha Ingiriiska iyo Faransiiska si ay kaaga haqab tiraan baahidaada. Waxaa muhiim kuu ah inaad hormarisid aqoontaada luuqada si aad u shaqayso, ula qabsato aadna si buuxda uga mid noqoto bulshada Kanada.



In kasta oo ay dowladda Kanada marka hore kaa caawinayso inaad bilowdo noolashaada Kanada, waxaa muhiim ah inaad yeelato himilo la gaari karo. Waxaa qasab ah inaad dadaasho si aad u wanaajiso noolashaada Kanada. Mustaqbalkaaga Kanada waxaa uu inta badan ku tiirsan yahay dadaalkaaga.

Dib ula deggida qoyskaaga

Mas'uuliyiinta Kanada ee wareysiga kula yeeshey waxay ku xasuusinayaan in adiga, xaaskaaga iyo caruurtaada aad isku foom ku codsan kartaan degganaanshaha Kanada. Haddii ay dhacdo inaad guursato, furto ama uu cunnug kuu dhasho, kaddib marka waraysiga lagula yeesho ama ka hor inta aadan Kanada u safrin, waa inaad arrintaa la socod sii saa hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan qaxootiga, [United Nations High Commissioner for Refugees (UNHCR) / Haut Commissariat des Nations Unies pour les réfugiés (UNHCR)] ama saraakiisha socdaalka ee Kanada si codsigaaga loogu darro xubnaha cusub ee qoyskaaga.

Waxaa muhiim ah inaad UNHCR ama saraakiisha Kanada u sheegtid inaad doonayso in qoyskaaga kula degaan. Waxaa sidoo kale muhiim ah inaad sheegtid magacyada xubnaha qoyskaaga (oo ay ku jiraan carruurtaada, waalaha, waalidkaa iyo xaaskaaga) haddii ay kula nool yihiin iyo haddii kalaba.

Waxaa muhiim ah inaad dhamaan xubnaha qoyskaaga taxdaa, xataa haddii aysan rabin inay degaan Kanada.

Qof aan kuugu jirin codsiga mustaqbalka ma keeni kartid Canada.

Haddii aad leedahay qaraabo ama saaxiibo dhow, kuwaas oo ku nool Kanada, aadna doonaysid inaad ag degto, waxaa muhiim ah inaad arrintaa la socod siiso UNHCR ama saraakiisha Kanada. Inta badan Kanada waxay isku daydaa in ay qaxootiga dejiso meel ay bulshadooda ku badan yihiin si loo caawiyo.

Xaalladaada soo galootinimo

Marka aad gaarto Kanada, waxaa lagu siinayaa warqad tusinaysa inaad Kanada ku noolaan karto waligaa, oo aad tahay deeggaan. Taasi micnaheedu wuxuu yahay inaad waligaa Kanada ku joogi kartid aadna ka shaqayn kartid oo aad waxbaran kartid.

Kaddib marka aad ku noolaatid 3 sano Kanada, isla markaana aad buuxiso shuruudaha lagaa rabo, waxaad codsan kartaa muwaadhinimada Kanada.



Halka aad uga noolaanaysid Kanada

Kanada waa dalka labaad ee dunida ugu weyn, waxaana ku yaallo magaalooyin iyo degmooyin badan iyo deegaanno aan la deggin. Inta badan magaalooyinka ayaa ku yaalla Koonfurta Kanada. Goobaha dadka ay deggan yihiin ayaa badankood kala fog, waqti bandanna loo socdaa, xataa haddii diyaarad loo raaco. Tusaale ahaan, masaafada u dhaxaysa Toronto iyo Vancouver waa 4,300 oo kilo mitir, waxaana ay diyaaradu u socotaa in ka badan afar saac. Waxaa lagu dejin karaa mid ka mid ah magaalooyinkaas.



In kasta oo ay kuu banaantahay inaad magaalo kale u guurto, haddana waxaan kugula tallinaynaa inaad hal meel degnaato ugu yaraan sanad. Waxay taasi kuu sahlayaa inaad ka faa'iideysato adeegyada lagu qorsheeyay.

Caawimaada Kanada

Waxaa jiro ururo badan oo caruurta, haweenka iyo raga ay leeyihiin oo aad ku biiri kartid. Waxaad ku biiri kartaa howlaha cayaaraha sida kubada, dabaasha, waxaana jiro waxyaabo badan oo aad qoys ahaan u samayn kartaan. Qaar waa lacag la'aan, kuwana lacag ayaa la iska rabaa.

Haddii ay jiraan kulamo ay leeyihiin dadka cusub ee deegaankaaga, isku day inaad ka qeyb gasho. Waxay taasi kaa caawinaysaa inaad saaxiibo ka dhex yeelato bulshada, isla markaana aad fahanto adeegyada deegaankaaga.

Inaad heshid dad aad isku bulsho tihiin waxay kaa caawin kartaa inaad fahanto noolasha Kanada, balse haka cabsan inaad caawimaad waydiisato dadka kale.



Bulshada Kanada

Wadanka Kanada, ragga iyo haweenka waa isku mid. Waa isku xaq, isku si ayaana loo xushmaynayaa. Ragga iyo haweenka ee ka tirsan qeybaha bulshada, dhaqanka, isirka, iyo diinta waa ay is dhexgali karaan, waxaana loo la dhaqmayaa si isku mid ah.



Kanada, waxaad xor u tahay inaad fikirkaaga ka hadasho, adiga oo xushmeynayo xaq dadka kale ay taasi u leeyihiin.

Waxaa laga yaabaa inaad u baratay inay qoyskaaga kula joogaan oo ay ku caawiyaan. Waxaad Kanada ku dareemi kartaa inaad cidlo tahay, balse ma tihid cidlo. Haddii aad wal wal qabtid, waxaad la hadli kartaa qof. La hadal qof ka tirsan bulshadaada. Waxaa ku dhex jira dad kaa caawin karo inaad la qabsato noolasha Kanada.



Kafaala qaadida qoyskaaga

Markii aad timaadid Kanada, waxaad kafaala qaadi kartaa qaybo kale oo kamid ah qoyskaada in ay imaadaan Kanada, balse waa in aad ogaataa in hanaankaan uu qaadan doono waqti deer, waxaana lagayabaa in aadan arkin qaar kamid ah qoyskaada sanado badan. Waxaa loo aqoonsan yahay xubnaha qoyska sida waalidiinta, awoowe iyo ayeeyayaal, xaas, iyo caruur adiga kugu nool. Waa in aad xaqiijisaa in xubnahaan ay ku qoranyihiin waraaqadaha codsiga markii aad imaanaysid Kanada. Abooweyaal iyo abaayayaal, eedoyin adeeryaal, ilmo adeer iyo caruurta qaan gaar ah lama kafaala qaadi karo.



Waa in aad xaqiijisaa in qoyskaaga ay ogyihiin meesha aad ka dagan tahay Kanada, sidoo kale waa in ay garanayaan cinwaankaada boostada ayna kujirto caasimada iyo gobolka aad ku nooshahay.

Shaqo raadin

Inkastoo adiga iyo qoyskaaga aad heli doontaan caawimaad dhaqaale sanadka ugu horeyso ee aad timaadaan Kanada, waa arin muhiim ah in aad raadsatid shaqo aadna isku filnaatid naftaada iyo qoyskaaga sida ugu dhaqsiiyaha badan. Sida wanaagsan ee aad ugu hadli kartid luqada ingiriiska ama faransiiska ayaa kuu sahli kartid shaqo helida.

Sidoo kale waa in aad ogaatid in hadii aad leedahay shahaado jaamacadeed ama dibloma ama shahaado ganacsi, lagayabaa inaan laga aqbalin Kanada. Waxay u talaa dowladda gobolka aad degeysid ama haayadaha sharciyeeya shahaadooyinka inay aqbalaan shahaadadaaha iyo in kale.

Hadii aad rabtid ini aad usoo dirtid lacag qoysaskaaga oga soo tagtey wadankaaga, fasax ayaad u tahay oo waad u diri kartid, balse qaxooti badan ayey dhib ku tahay in ay naftooda maareeyaan balse hadana lacago udira qoyskooda ay ka soo tageen. Xasusnow in waqti ayey kugu qaadan doonto in aad la qabsatid noolashaada cusub ee Kanada.



Qarashaadka

Markii aad timaadid Kanada, waxaad ka heli doonta caawimaad dhaqaale dawlada Kanada mudo 12 bilood ah.

Mar hadii ay caawimaadaas ay dhamaato, waxaad masuul ka noqon doonta bixinta qarashaadkaaga sida raashinka, kirada, korontada, biyaha, darka iyo canshuurta. Waa muhiim in aad baratid sida loo miisaaniyeynaayo lacagtaada.



Iskoolka

Ma bixin doontid lacag ay ciyaalka ku dhiganayaan iskoolaadka asaasiga ah iyo dugsiga sare. Dhamaan caruurta jirto sanadka 6 ila 16 sanno waa qasab in ay aadaan iskoolka, waa sharci. Ardeyda badankood waxey aadaan dugsiga sare inta ay oga qalin jabinayaan shahaadada diblooma, (18 sanno jir). Kadib marki ay dameeyaan dugsiga sare waxey aadi karaan jaamacad mise kollej, waa hadii ay awodi karaan, kollejka iyo jaamcada waa lacag.



Daryeelka ilkaha

Inkastoo ay dawlada ay bixineyso qarashka caafimaadka sida la kulmida dhaqtarka hadana waxey bixin doonta la kulmida gurmada caafimaad ee deg deg ah daqtarka ilkaha sanadka ugu horeyso ee timaado Kanada, balse kuma jirto qarashka daaweynta ilkaha caadiga ah, hadii aad u baxatid in aad la kulantid daqtarka ilkaha, badana adiga ayaa masuul ka ah qarashkaas.



Raashinka iyo biyaha

Biyaha Kanada waa nadiif oo waa la cabi karaa. Guri kaste wuu leeyahay biyahiisa oo kuleel iyo qabow ugaar ah oo socdo. Waad heli kartaa biyo waqti kasto ee maalin iyo habeen Tuubada biyaha Dad dhaqamo badan oo kala duwan ayaa ku nool Kanada. Waad ka heli kartaa dhamaan cuntada aad cuntid sida bariiska, rootiga, qudaarta, iyo digaaga bakhaarka qudaarta kuugu dhow. Sidoo kale Kanada waxay leedahay bakhaaro kale oo leh alaab heer sare ah sida hilibka ariga, kuwaas oo aan lagu gadin suuqa qudaarta. Sidoo kale cuntada xalaasha waa laga helaa.



Diinta

Diimo badan ayaa kajiro Kanada. Waxaa lagu ogalaan doonaa in aad diintaada ku dhaqantid si xor ah. Sharciga Kanada ayaa kaa codsanaayo in aad xushmeyso dadka ku dhaqmo diimaha kala duwan. Laguma weydinaayo ama laguuguma qasbki karo in aad diintada bedeshid. Xornimada diinta waa mid kamid ah xuquuqda asaasiga ah ee Kanada.



Cimilada hawada

Waxaa jiro afar xili oo kala duwan dalka Kanada, gu, xagaa, deyr iyo qoraxeed. Kanada waa dal aad u weyn cimilada waqti kaste wey ka kala duwanaan kartaa qeybaha kale ee dalka. Gu,(bisha maarso, april iyo bisha 5aad) waa xili roobeed wadanka qaybo badan oo katirsan wadanka Kanada, cimiladana qabow ayey noqon kartaa. Xiliga xagaaga(bisha 6aad, luuliyo iyo bisha 8aad) hawada waa kuleel, meelo badan oo katirsan wadanka, maalintii, cabirka kuleelka wuxuu gaaraa in kabadan 20°C mararka qaarna wuxuu gaaraa in kabadan 30°C. Xiliga dayrta (sebtembar, octobar, iyo novembar) cimilada waa qabow aad ayeyna roob u shumi karaa. Markii lagu guda jiro bilyooinka xiliga jiilaalka (disembar, janaayo iyo febraayo) cimilada wadanka badankiis waxey gaartaa 0°C waxeyna hoos oga dhici kartaa ilaa -30°C maalin iyo habeen. Xiliga jiilaalka aad ayey qabow noqon kartaa waxaana lagaaga baahan yahey in aad dhar u xiratid sidi looga baahnaa.



Dardaaranki kuugu dambeeyey

Bilaabida noolal cusub ee Kanada waa arin cajiib ah, dadka qaar ayaa laga yaabaa in ay u arkaan arin culus. Waxey qaadataa waqti in aad la absato, marka sabar muuji. Qaar badan oo kamid ah dadka cusub oo adigoo kale ah ayaa la qabsadey waxeyna si buuxda u dhex galeen bulshada Kanada.

Ku hadlida luqada ingiriiska ama faransiiska aad ayey muhiim ugu noqoni doonta in aad raadsato adeega bulsho, shaqo iyo in aad guud ahaan la qabsato noolasha Kanada. Hadii aad fursad uheshid intaadan imaanin Kanada waa in aad isku daydid in aan kordhisid xirfadaha luqadaha. Markaad timaadid kadib, waa in aad ka faaiideysatid fursadooyinka si aad u hormarisid hadalkaaga, akhrintaada.

Weydii dadka kuu dhow suaalo.

Xasuusnow waxaa jiro dad adeeg joogta kuu ah si aay kuu caawiyaan.

